



# Child Health Plus Ee Milicsiga

## WAA MAXAY ADEEGYADA LA DABOOLU?

### YAA U QALMA?

#### CARRUURTA EE KA:

- Hooseeyo da'da 19
- Dadka dagan Gobolka New York
- Uma qalmo Medicaid
- Aanan ku daboolneyn caymiska kale ee caafimaadka
- Uma qalmo ama kama diiwaangashano caymiska caafimaadka oo illaa barnaamijka faa'idooyinka caafimaadka gobolka (NYSHIP)
- Carruurta waxay u qalmi karaan oo aan laga eegin heerka socdaalka

NY State of Health waxay u hoggaansanta sharciyada xuquuqaha madaniga Federaaliga ee lagu dabi karo iyo sharciyada gobolka, oo wax kuma takoorto qaababka isirka, midabka, asalka qaranka, caqiidada/diinta, sinjiga, da'da, heerka guurka/qoyska, diiwaanka xabsiga lagu qaatay, dembi kuhelida falka dambi, aqoonsiga sinjiga, qaabka galmada, sifooyinka u nuglaanshaha hidda sidaha, heerka guurka, gabood falka guriga heerka dhibanaha iyo/ama aargoosiga.

- Booqashada wanaagsan ee carruurta
- Baaritaanada jirka
- TALLAALLADA
- Daryeelka bukaanka jiiifka isbitaalka
- Sheybaarka iyo adeegyada sawirida
- Adeegyada Ilkaha iyo Aragtida
- Adeegyada degdega
- Daawaynta jidhka iyo daawaynta xiliga gaaban
- Daawooyinka aanan dhaqtarka qorin, haddii uu ku amro dhaqtarka
- Adeegyada bukaan socodka daaweynta muddada gaaban (daaweynta kiimikada, kelyo sifeynta)
- Caafimaadka maskaxda bukaan jiiifka iyo bukaan socodka iyo nidaam darada xadgudubka maandooriyaha
- Adeegyada Hadalka iyo Maqalka

Tani maaha liiska dhammaan lagu wada jiro ee dheefaha la daboolo. Waa inaad toos ula xidhiidho qorshahaaga caafimaadka wixii su'aalo kasta ah oo ku saabsan adeegyada iyo dheefaha lagu daboolo dhexda qorshahaaga caafimaadka iyo adeeg bixiyayaasha.

#### NAGALA SOO XARIIR:

[nystateofhealth.ny.gov](http://nystateofhealth.ny.gov) | 1-855-355-5777 or TTY 1-800-662-1220

## IMISA AYUU JOOGAA QORSHAHA CHILD Health Plus?

**LACAGTA CAYMISKA BIL-LAHA:** Qiimaha bilaha ah waxa uu ku xidhan yahay dakhliga bilaha ah iyo cabbirka qoyska. Ma jirto lacag caymiska bilaha ah ee qoysaska dakhliyada hoose leh. Qoysaska leh dakhliyada sare waxay bixiyaan lacagta caymiska bilaha ah, isa waafaqsan jaantuuska hoose. Qoysaska balaaran, qidmada bil-laha waxaa la geliyaa sadex carruur. Qoysaska daqliga ka sareeyo heerka daboolida kaalmada waxay bixiyaan lacag bixinta caymiska buuxo oo iska badelyso ka qeybqaadashada qorshaha caafimaadka.

**QARASHKA LA WADAAGAYO:** Child Health Plus ma lahan ka jarida sannadlaha iyo ma jiraan lacag bixinta caymiska.

Ugu badnaan Daqliga Sannadlaha oo Cabirka Qoyska ah				Tabarucida Qoyska Bil-laha oo Canuglaba (tirada ugu badan ee carruurta aad ka bixineysid waa 3)
1	2	3	4	
\$30,170	\$40,649	\$51,127	\$61,605	\$0
\$33,975	\$45,775	\$57,575	\$69,375	\$15 (ugu badnaan \$45)
\$40,770	\$54,930	\$69,090	\$83,250	\$30 (ugu badnaan \$90)
\$47,565	\$64,085	\$80,605	\$97,125	\$45 (ugu badnaan \$90)
\$54,360	\$73,240	\$92,120	\$111,000	\$60 (ugu badnaan \$180)
ka badan\$54,360	ka badan\$73,240	ka badan\$92,120	ka badan\$111,000	Lacag bixinta caymiska buuxo, waxay ku kala duwantahay qorshaha caafimaadka (ma jirto tirada ugu badan oo loo cayimay qoyska)

\*Ku salaysan Heerarka Fakhriga Federaalka 2022 (FPL). Heerarka Dakhliga waa la habbayn karaa sanad kasta iyaddoo ku salaysan isbeddelada FPL.